

## **XEER MAAMUL L. 58 EE 20 AGOOSTO 1956**

**Samaynta guddi iskuduwidda arrimaha fooxa.**

KADDIB MARKII LA ARKAY wareegtada 18 February ee 1956, n. 7 kaas oo dejinaya habraacyada dhoofinta beeyada;

LA AQOONSADAY fursad loo sameeyo guddiga iskuduwidda arrimaha fooxa.

Dhinaca fooxa kaas oo uu danta dhaqaalaha dalka;

Iyadoo la tixgeliyey Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha;

Kadib markii la dhegeystay Golaha Wasiiradha;

### **WAXAA LA AMRAY**

#### **Qod. 1**

Waxaa la dhisay Guddiga isku dubaridda ee dhinaca fooxa oo ka kooban:

- |                            |   |
|----------------------------|---|
| — Dr. Luigi Gasbarri       | — Madaxa Xafiiska Gaarka ee Arrimaha Dhaqaalaha – Guddomiye |
| — Dr. Salvatory Spadaro    | — Xisaabiyaha Guud ama qof isaga wakiil ka ah - Xubin       |
| — Mud Moxamed Cawale Liban | — Wakiil Wasaaradda Arrimaha Gudaha – Xubin                 |
| — Dr. Sebastiano Caccetta  | — Wakiil Wasiirka Maaliyada – Xubin                         |
| — Comm Antonio Carmi       | — Agaasimaha Amaahda Somaliyeed – Xubin                     |
| — Mud Amedeo Barbarossa    | — Agaasimaa Xafiiska Ganacsiga CIMS- Xubin                  |
| — Dr. Armando Covatta      | — Wakiilka Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha – Xubin- Xoghaye    |

#### **Qod. 2**

Howlaha Guddiga Iskudubaridka howlaha fooxa waxaa ka mid ah:

- Isku dubaridka iyo kormeerka howlaha ka socda Mijuurtiniya iyadoo la tixgelinaya baahida CIMS in la gaarsiyo madaxbaanidda dhaqaale iyo maaliyadeed;
- Isku dubaridka shaxda iyo isla sinka caanshuuraha lagu dabaqo rugyada ay ka jiraan iskashatooyinka, ee la xiriira kharajyada joogtada ha iyo kuwa soo noqnoqda ( xirxirridda, gaadiidkda, rariska iyo dejinta iwm);
- La talinta kharajda aan lagu tala gelin;
- So gudbinta aragtida howl galka maamulka iyo xisaabaadka ee howlaha 1954/55, 1955/56 iyo intii ka dambeysay;
- Taakuleynta CIMS kormeerka ha ahaado mid tekniko- ganacsiga ama mid maamul iyo xisaabinta;
- Soo jeedinta Iskashatada iyo Dowladda, wixii aragti ah oo lau hormarin karo howlaha fooxa si sare loogu qaado qiimaha fooxa iyo xubinta oo uu u yeelan karo kobcinta misaaniyadda Dalka kadib iibista fooxa markii dibedda la geeyo.

**Qod. 3**

Xubnaha Guddiga sare ku suxan waxay xaq u yeelan doona wixii xaq ee sharcigu u qondeeyo.

Muqdisho, 20 Agoosto 1956.

**Maamulaha**

**Franco**

**Rai'sul Wasaaraha**

**Abdullahi Issa**

Waa la arkay lamba. 505 ee 20 Agoosto 1956

Madaxa Xisabaadka: **Tura**

Waa la arkay lana diwaan geliyey lamba. 17 bogga lamba. 101

Xisaabiyha Guud: **Spadaro**

**Wasiirkha Arrimaha**

**Dhaqaalaha Haji Farah Ali Omar**